# Sida Loo Hago Dalabka Yar

**Tilmaamahan caadiga ah waxaa loogu talo geley ujeedo macluumaad sheeg oo kaliya oo maaha talo sharci oo ku saabsan kiiskaaga.**

## MACLUUMAAD GUUD

- Maxkamada Dalabyada Yaryar waxay ka shaqaysaa kiisaska qaar kaliya sida uu dhigayo §13-6-403, C.R.S. Tusaale ahaan dalabyada lagu soo ceshanayo lacagta ama hantida uu qofku lahaa, fulinta ama samaynta heshiis, ama u hogaansanka heshiisyada xaddidaadeed.
- Hadii dalabkaagu ka badan yahay $7,500.00, waxa aad ka tanaasuli kartaa baaqiga wixii ka badan $7,500.00.
- Laguuma ogola inaad u qaybiso dalabyada laba kiis oo kala duwan.
- Kama xarayn kartid wax ka badan laba dalab wixii Maxkamada Dalabyada Yaryar ah ee Degmada bishii ama wax ka badan 18 dalabyo Degmada sanadkii.
- Sharciga Xadidaadu wuu kala duwan yahay oo waxa uu ku xidhan yahay nooca dalabka.
- Xadiga sharciga ah ee ribadu waa 8% oo libi laabanta sanadkii.
- Dhamaan ficilada dalabyada yaryar waa in la hor keenaa degmada wakhtiga la xaraynayo dalabka eedeysanuhu uu degan yahay, ama si joogto ah uga shaqeeyo, ama uu ku leeyahay xafiis uu ku shaqaysto, ama uu ka yahay arday wax ka dhigto waxbarashada sare. Talaabada dhaqan gelinta ee heshiisyada xaddidaadeed ama ka timaada khilaaf ah deebaajiga, talaabadu waxaa la hor keeni karaa degmada hantida qofku ay ku taalo. Kaalmada dhex dhexaadinta/ka heshiinta waxaa laga dhex dalban karaa Maxkamadaha Dalabka Yaryar.
- Dhamaan kiisaska waxa lagu hor dhegaysanayaa Xaakinka Kiisaska Yaryar ama Qaadi. Maxkamadeynta Xeerbeegtida lama ogola.
- Hadii aad tahay eedeysane **meesha haka saarin** Wargelinta, Dalabka iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada. Xukun kaa dhan ah ayaa lagu xukumi karaa, oo dhinaca kale ayaa bilaabi kara nidaamka qaadashada.
- Hadii aad tahay Dacwoodaha **meesha haka saarin** jawaabta ama dooda. Xukun kaa dhan ah ayaa lagu xukumi karaa, oo dhinaca kale ayaa bilaabi kara nidaamka qaadashada.
- Maxkamadu kuuma soo qaadi karto xukunkaaga adiga.
- Wixii macluumaad dheera adah, fadlan ka eeg Shuruucda Dacwada ee Colorado wixii Dalabyada yaryar ah (Shuruucda 501 – 521).
- Hadii aad qabto laxaad la'aan una baahantahay qaabilaad macquul ah si aad u isticmaasho maxkamada, fadlan la xidhiidh Isku Duwahaaga ADA ee deegaanka. Macluumaadka xidhiidhka waxaa laga heli karaa websaytka soo socda: **http://www.courts.state.co.us/Administration/HR/ADA/Coordinator_List.cfm**

## WEEDHAHA CAAMKA AH

| | |
|---|---|
| ⌦ Dhibbane: | Qofka shirkada ama hay'ada kale ee xaraysay dacwada. |
| ⌦ Eedaysane: | Qofka, shirkada ama hay'ada kale ee kiiska dacwada ah laga xareeyay. |
| ⌦ Cabasho: | Foomka Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmadaha in la Yimaado Maxkamada ee sheegaya xadiga la sheeganayo iyo sababta sheegashada. |
| ⌦ Yeedhmo: | Qaybta foomka Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmada Imaantinka Maxkamada ee u sheegaya Eedeysanaha goorta iyo meesha ay imanayaan. |
| ⌦ Jawaab: | Qaybta foomka Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada ee Eedeysanuhu ku sheegi karo sababta sheegashada ay been u tahay ama ay u khaldan tahay xadigeedu. |
| ⌦ Dooda: | Qaybta jawaabta ee lagu sheegayo sababta Dacwooduhu uu ugu leeyahay lacagta ama hantida Eedeysanaha. |
| ⌦ U Gaynta: | Qaabka rasmiga ah ee Wargelinta, Dalabka iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada loogu geeyo Eedeysanaha si loogu sheego isaga/iyada in dacwad laga xareeyay. |
| ⌦ Amarka maxkamadeynta dood lid ah la'aanta: | Hadii eeedeysanuhu aanu iman wakhtiga Maxkamada, Maxkamadu waxa ay soo saari kartaa amarka "maxkamadeynta dood lid ah la'aanta" oo waxa uu siin karaa Dacwoodaha dhamaan ama wax kamid ah kaalmooyinka ku xusan Wargelinta, Dalabka iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada. |

| | |
|---|---|
| ⌦ Taariikhda Maxkamada: | Taariikhda Dacwoodaha iyo Eedeysanuhu ay tahay inay yimaadaan Maxkamada, oo waxa ay ku qoran tahay Wargelinta, Dalabka iyo Yeedhmada Imaantinka Maxkamada. |
| ⌦ Dhexdhexaadin: | Nidaam sir ah, oo aan rasmi ahayn oo cid kale oo sadexaad oo tobobaran ay ka caawiso dadka is haya inay uga heshiiyaan waxay ku muransan yihiin oo ay labada dhinacba aqbalayaan. |
| ⌦ Dhici kartaa: | Weedha sharciga ah ee, "dhici kartaa" waxaa lagu sheegaa "ikhtiyaar" ama "awood." |
| ⌦ Waa inuu: | Weedha sharciga ah, "waa inuu" waxay muujinaysaa "waajib." |

# KHARASHKA

Kharashka xaraynta waxay ku xidhan tahay xadiga dalabka. Hadii aanad awoodin in aad bixiso, waa inaad buuxisaa Dhaarta Xaraynta Dacwadda bilaa Lacag iyo Taageerada Dhaqaale (JDF 205) oo aad u gudbisaa Maxkamada. Marka aad gudbiso foomka JDF 205 ee aad buuxisay iyo qiimaha adeegga (JDF 206), Maxkamada ayaa go'aamin doonta hadii loo baahan yahay inaad bixiso kharashka xeraynta iyo in kale.

- Dalabka ilaa $500.00: $31.00
- Dalabka $500.01 ilaa $7,500.00: $55.00

## Kharashka jawaabta ee uu bixinayo Eedeysanuhu waa sida hoos ku cad:

**Jawaabta aan wadan dooda:**

- Dalabka ilaa $500.00: $26.00
- Dalabka $500.01 ilaa $7,500.00: $41.00

**Jawaabta wadata dooda**:

- Hadii Dacwooduhu uu dalbanayo $500.00 ama wax ka yar oo dooduna tahay $500.00 ama ka yar: $31.00
- Hadii Dacwoodaha dalabkiisu ay ka badan tahay $500.00 ama ka yar tahay dooda ay ka badan tahay $500.00 oo ayna ka badneyn $7,500.00: $46.00

## Kharashaadka kale ee dhinaca ku jira kiiska ay tahay inay bixiyaan waxaa weeye sida soo socota:

| | |
|---|---|
| ❑ Nuqulada Waraaqaha (Waraaqaha Faylka Ku Jira) | $.75 bogiiba $1.50 hadii labada dhinac ay yihiin |
| ❑ Nuqulada Waraaqaha (Waraaqaha aan Faylka Ku Jirin) | $.25 bogiiba ama $.50 hadii labada dhinac ay yihiin |
| ❑ Kharashka Gaynta | Waa uu Kala Duwan Yahay (La Siinayo U Geeyaha) |
| ❑ Kharashka Xaqiijinta | $20.00 |
| ❑ Waraaqaha Sharciga ee Ka Saarida Guriga | $45.00 |
| ❑ Qoraalka Xaakinka | $25.00 |
| ❑ Qaneecada Xukunka | $20.00 |

# FOOMAMKA

Si aad foomamka onleyn ahaan u gasho, qabo websaytka **www.courts.state.co.us** oo guji **"Foomamka"** Daaqadooda. Foomamka waxaa lagu heli karaa PDF ama WORD iyada oo la dooranayo **"Dalabyada Yaryar".** Si aad ugu gasho foomka onleyn ahaan, fadlan guji PDF ama WORD adiga oo akhrinaya cinwaanka foomka. Waxa aad buuxin kartaa foomamka onleyn ahaan oo waad daabici kartaa ama inta aad daabacdo ayaad ku qori kartaa ama ku daabici kartaa khad sax ah oo madaw. **JDF 250 waxaa weeye foomka dalabka hore ee aad u baahan tahay si aad u xarayso Kiiska Dalabyada Yaryar.**

❑ JDF 250 — Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada

**Foomamka dheeraadka ah ee aad u baahan karto:**

❑ JDF 75 — Shuruudaha
❑ JDF 254 — Codsashada ama Codsashada Wax Samayn

# TALAABOOYINKA XARAYNTA KIISKAAGA

## Talaabada 1: Buuxi Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada (JDF 250).

- ❑ Aqoonsiga magacyada iyo cinwaanada Dacwoodaha iyo Eedeysanaha ee qoraalka, eeg boga 3.
- ❑ Sidoo kale, hadii Eedeysanuhu uu yahay ganacsi ama hay'ad qabo onleyn ahaan [www.sos.state.co.us](http://www.sos.state.co.us) (dooro qaybta ganacsiga) si aad u ogaato hay'ada duwaan gashan ee buuxinaysa u gaynta Eedeysanaha. **Fiiro gaar ah:** Waxaa muhiim ah in aad ogaato samayska ganacsiga Eedeysanaha. Tusaale ahaan, hadii ganacsigu uu yahay mid qof kaliya leeyahay, shuraako, imw. Sharciga 304 ee Shuruucda Colorado ee Nidaamka Madaniga ah ee Dacwada Degmada, ayaa sheegey sida u geynta ay tahay in loo sameeyo iyada oo laga duulayo nooca ganacsiga oo macluumaadkan waxa uu ka caawin doonaa shakhsiga garanaya shuruucda u geynta marka la gaadhsiiyo JDF 250.
- ❑ Hadii Eedeysanuhu uu yahay hay'ad dawladeed, waxaa lagaaga baahan karaa inaad u xarayso wargelin qoraal ah Xeer Ilaaliyaha Guud ama wakiil dawladeed oo kale, kahor inta aan loo xaraynin kiiskaaga Maxkamada, sida uu dhigayo §24-10- 109, C.R.S.
- ❑ Fadlan kaga jawaab dhamaan afarta su'aalood **Haa** ama **Maya**.
- ❑ Maxkamadu waxay ku buuxin doontaa sanduuqa taariikhda Maxkamadu dhacayso marka aad xarayso waraaqahaaga.
- ❑ Qaybta dalabka Dacwoodaha fadlan waxa aad ku qortaa sharax kooban oo dalabkaaga ah. Waxa aad ku dartaa waxa aad dalbanayso, xadiga aad dalbanayso, iyo soo koobida sababo aad ku taageerayso dalabkaaga.
- ❑ **Hadii aad buuxisay JDF 250 adiga oo isticmaalaya WORD ama PDF noocyada ah, waxa aad xaqiijisaa in aad buuxiso dhamaan 4 ta qaybood ee foomka.**
- ❑ Haku lifaaqin wixii bandhig ah ama waraaqo ah foomkan.

<table>
<tr><td>Maxkamada Dalbyada Yaryar (Far waaweyn ku qor/ku qor magaca degmada halkan) Degmada, Colorado<br>Cinwaanka Maxkamada:</td><td rowspan="3">▲ KALIYA MAXKAMADA AYAA ISTICMAALAYSA ▲<br>Lambarka Dacwada:<br><br>Waaxda Qolka Maxkamada</td></tr>
<tr><td>DACWOODAHA: (Far waaweyn ku qor/ku qor magacaaga iyo macluumaadkaaga halka hoose.)<br>Cinwaanka: ______________________<br>Magaalada/Gobolka/Zip: ______________________<br>Taleefanka: Guriga ____________Shaqada ____________<br>v.</td></tr>
<tr><td>EEDEYSANAHA: (Far waaweyn ku qor/ku qor magaca Eedaysanaha iyo macluumaadkiisa halka hoose.)<br>Cinwaanka: ______________________<br>Magaalada/Gobolka/Zip: ______________________<br>Taleefanka: Guriga ____________Shaqada</td></tr>
<tr><td colspan="2">MAGACA FOOMKA</td></tr>
</table>

## Talaabada 2: Ka xaree Foomkaaga Maxkamada.

- ❑ Sii Maxkamada Foomka. **Hadii aad buuxinayso foomka adiga oo isticmaalaya WORD ama PDF noocyada ah, waxa aad soo wada qaadaa afarta qaybood (7 bog) marka aad imanayso Maxkamada. Hadii aad hayso foomka NCR, waxa aad soo qaadaa afarta qaybood ee foomka.**
- ❑ Waxa aad bixisaa kharashka xarаynta ee $31.00 ama $55.00 kolba sida ku munaasabka ah
- ❑ Maxkamadu waxay buuxin doonaa qaybta lagu sheegayo taariikhda iyo saacada Maxkamadu dhacayso. Taariikhda ay dhacayso Maxkamadu waa ay ku kala duwan yihiin Maxkamaduhu. Maxkamadu waxay u baahan kartaa dhex dhexaadin kahor taariikhda Maxkamadu dhacayso ama taariikhda Maxkamadu dhacayso lafteeda.

## Talaabada 3: U gee Wargelinta, Dalabka, iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada

- ❑ Waxaa u muhiim ah in loo geeyo ugu yaraan 15 maalmood kahor taariikhda ay maxkamadu dhacayso. Hadii kale, taariikhda maxkamada ayay noqonaysaa in mar kale loo dhigo ama kiiska meesha laga saaro.
- ❑ Nuqul gaar ah "**nuqulka Eedeysanaha**" waa in la gaadhsiiyaa Eedeysane kasta. Hadii ay jiraan wax ka badan hal Eedeysane, waxa aad Xaga hore iyo gadaal uga samaysaa nuqul"**nuqulka Eedeysanaha**" Eedeysane kasta.
- ❑ Waxa aad leedahay laba ikhtiyaar oo aad ku gaadhsiinayso.

**Inaad Gacanta ka Saarto:**

- ❑ Doorato Waaxda Bilayska, cid gaar ah oo gaadhsiiso ama qof aad garanayso oo 18 jir ah ama ka wayn, oo aan kamid ahayn kiiska, oo garanaya shuruucda gaadhsiinta inuu gaadhsiiyo Eedeysane kasta. Waxaa la siiyaa kharash Waaxda Bilayska ama Gaadhsiiyaha Gaarka ah. Kharashka gaadhsiintu caadiyan waxaa lala bixiyaa kharashkaaga maxkamada hadii aad ku guulaysato kiiskaaga.
  - ❑ Waxa aad ka doon dooni kartaa gaadhsiiyaha gaarka ah buuga taleefanada qaybta Gaadhsiinta Dacwada.
  - ❑ Waxa aad siisaa gaadhsiiyaha hal nuqul oo loogu talo galay Eedeysane kasta oo Wargelinta, Dalabka iyo Yeedhmada Imaatinka Maxkamada ah**"nuqulka Eedeysanaha"** iyo **"Bayaanka Gaadhsiinta"** qaybta ah.
  - ❑ Gaadhsiiyaha ayaa kuusoo celin doona qaybta Bayaanka Gaadhsiinta oo buuxda ee foomkan adiga si aad ugu soo qaadato oo aad ugu xarayso Maxkamada kahor ama maalinta Maxkamadu dhacayso.
  - ❑ Hayso nuqul Bayaanka Gaadhsiinta ah adigu.

**Boos uu Xaqiijiyay Karaaniga Maxkamadu:**

- ❑ Waxa aad dalban kartaa in Maxkamadu ay ugu dirto wargelinta boosta la xaqiijiyay. **Kaliya maxkamada ayaa sidaa samayn karta**. Boosta la xaqiijiyay maaha qaabka la doorbido in lagu gaadhsiiyo qofka oo waxay keeni kartaa dib u dhac dhagaysiga Maxkamada ah.
  - ❑ Waxaa kugu waajib ah inaad bixiso kharashka boosta la xaqiijiyay wakhtiga aad xaraynayso kiiska. Kharashkan wuu kala duwan yahay oo waxa uu u dhaxeeyaa $5.00 ilaa $15.00.
  - ❑ **Hadii boosta la xaqiijiyay la buuxin kari waayo, waxa aad u baahan doontaa in ay weli kuu gaadhsiiyaan bilayska ama geeyuhu foomka.**

## U DIYAAR GARAWGA DHEX DHEXAADINTA

Dhexdhexaadintu waxay noqon kartaa qaab wax ku ool ah oo lagu xaliyo murankaaga. Dhexdhexaadinta, cid dhexdhexaad ah ayaa kala shaqaynaysa dhinacyada sidii si sir ah ay uga heshiin lahaayeen oo ay labada dhinacna u aqbali lahaayeen. Waxa ay kaa dalban kartaa Maxkamadu dhex dhexaadin, ama waxa aad dooran kartaa dhex dhexaadin xaliya kiiskaaga adiga oo aan qaban maxkamad. Adeegyada dhex dhexaadinta waxaa laga heleyaa Xafiiska Colorado ee Xalinta Muranka (720-625-5940) ama dhex dhexaadiye gaar ah (ka eeg Buuga Taleefanada). Meelaha qaar waxaa laga helaa adeegyo dhex dhexaadin oo bulsho oo bilaash ah ama qiimo jaban.

Waa inaad soo qaadataa wixii waraaqo sharci ama dhaqaale iyo wixii macluumaad ah ee la xidhiidha muranka marka aad u imanayso dhexdhexaadinta.

## NATIIJADA KA DHALAN KARTA DHEX DHEXAADINTA

- ❑ Adiga iyo dhinaca kale waxa aad ku heshiin kartaan shuruudo/heshiis. Diyaari foomka shuruudaha (JDF 75) si aad u ogaataan heshiiska. Labada dhinacba waxay saxeexayaan foomka oo waxay siinayaan Maxkamada.
- ❑ Dhinac ayaa ogolaan kara in lacagta lagu leeyahay oo wuu bixinayaa. Diyaari foomka shuruudaha (JDF 75) si loo sheego heshiiska iyo lacagta la bixinayo. Labada dhinac waa inay saxeexaan foomka oo ay siiyaan Maxkamada, si markaa Maxkamadu u ogaato in kiiska meesha laga saaray. **Shuruudaha waa in lagu hor sexeexaa karaaniga maxkamada ama nootaayada shacabka.**
- ❑ Hadii adiga iyo dhinaca kale aydaan isla qaadan shuruudo/heshiis, markaa waxa aad galaysaan Maxkamada.

## U DIYAAR GARAWGA MAXKAMADA

Waxaa muhiim ah in aad timaado wakhtiga Maxkamada ama aad kasoo horeyso oo aad soo qaatato dhamaan macluumaadka aad u baahan tahay. Fadlan bakhtii taleefankaaga oo waxa aad qadarisaa dhammaan dhinacyada kale inta aad maxkamada joogto. Waxaa lagaa dalban karaa inaad la hadasho dhinac kale kahor inta ayna Maxkamadu bilaabmin si loo ogaado in sheegashada laga heshiin karo si maxkamada loo baajiyo. Hoos waxaa ku yaala dhawr talaabo oo ay tahay in la raaco:

- ❑ Kahor taariikhda maxkamadaada, waydii Karaaniga hadii aad daawan karto maxkamada dalab yar. Tani **maaha khasab**, laakiin waxaad la qabsanaysaa Maxkamada oo waxa aad u diyaar garoobaysaa maxkamadaada.
- ❑ Ogow cadaymaha aad u baahan tahay. Waxaa aad u wanaagsan inaad habayso oo aad calaamadiso dhamaan bandhigyada, hadii aad leedahay wax ka badan hal. Tusaaleyaal bandhigitaano waxaa weeye waraaqo sida sawiro, shax, iyo risiidho. Nuqulo ka samee bandhigyada si ay Eedesanaha iyo Maxkamadu u arkaan. Hadii Maxkamadu ay kuu hayso nuqulo adiga, kharashka nuqulada ayaa la qiimayn doonaa.

- ❑ Oggow hadii aad u baahan tahay wax markhaatiyaal ah. Waxa aad ka dalban kartaa markhaatiyaasha inay si ikhtiyaar ah u yimaadaan, ama waa inaad ka dalbataa Maxkamada inay kuugu dirto yeedhmo markhaati kasta. Tilmaamaha Samaynta Yeedhmada (JDF 79) waxa laga heleyaa websaytka maxkamada oo waxa uu ku hoos jiraa Qaybta Guud. Maxkamadu waxay aqbalaysaa bayaan qoraal ah oo ka socda markhaatiyaasha badanaa xaaladaha.
- ❑ Kahor inta aanad iman maxkamada, waxa aad ku muujisaa mushkiladaha waawayn ee aad doonayso inaad soo bandhigto. Marka dadka kale ay marag furayaan, waxa aad qortaa waxay yidhaahdeen.

## NATIIJADA LAGA FILAN KARO MAXKAMADA

- ❑ Xaakinka Kiisaska Yaryar ama Qaadigu waxa uu sida caadiga ah eegi doonaa xaqiiqooyinka, cida guulaysata, iyo xadiga loo xukumayo. Xaakinka Kiisaska Yaryar ama Qaadigu sidoo kale waxa uu u xukumi karaa kharashka (kharashka xaraynta, kharashka gaysta iyo kharashka markhaatiga, hadii ay munaasab tahay) dhinaca guulaystay.
- ❑ Dhinaca ay u xukuntay maxkamadu ayaa masuul ka ah qaadashada lacagta. **Maxkamadu kuuma samaynayso taas.**
- ❑ Maxkamadu waxay siin kartaa qofka lagu leeyahay lacagta Mooshinka & Amarka Su'aalaha - Foom Gaaban (JDF 252A) ama Mooshinka & Amarka Su'aalaha - Foom Dheer (JDF 252B) midkood. Su'aalaha waxaa loogu talo geley inay gacan ka geystaan ogaanshaha dhinucu meesha uu ka shaqeeyo, lacagta lagu hayo xisaabta akoonada kaydka/la adeegsado, iyo hantida cida daynta lagu leeyahay ay leedahay taas oo gacan ka geysan karta lacagta la uruurinayo.
- ❑ Macluumaad ururin oo dheeraad ah oo cinwaankeedu yahay "Tilmaamaha Uruurinta Xukunka iyo Buuxinta Nidaamka Xanibaada Hantida" (JDF 82) waxaa laga helayaa websaytka qaybta Xanibaada.